



# Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye, waxay u dhawdahay inuu idiin la soo dago ina Maryama isago xaakim caadil ah, oo uu jejebiyo macatabka, oo dilo khansiirka, oo uu soo rogo jisyada, oo maalku buux dhaafo, heer cid qaadata oo baahan la waayo

Abii hurayra-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ayaa yiri: "Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartaye, waxay u dhawdahay inuu idiin la soo dago ina Maryama isago xaakim caadil ah, oo uu jejebiyo macatabka, oo dilo khansiirka, oo uu soo rogo jisyada, oo maalku buux dhaafo, heer cid qaadata oo baahan la waayo."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu ku dhaartay inay soo dhowaatay waqtigii uu Nibi Ciise soo degi lahaa, ee uu dadka cadaalad ku xukumi lahaa, isagoo raacaya shareecadii Nabi Maxamed scw. Oo Nabi Ciise uu jabindoona macatabka kiristaanku wayneeyaan. Nabi Ciise wuxuu dilidoonaa khinsiirka, Nabi Ciise wuxuu soo rogidoonaa jisyada dadka oo dhana wuxuu ku amridoona inay Islaama soo galaan. Xooluhu waa badandoonaan qof qaadanayana ma jiro, waayo xoolihii ayaa iska badanaya, qof walbana wuxuu ku kaaftoomay wixii gacantiisa ku jira, waxaa soo dagaya Barkada waxaana is raacraacaya khayrka.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65025>

